



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisa, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Noofambar 9, 2020

Ku socota: Shaqaalaha iyo Daneeyayaasha ODDS, oo ay ka mid yihiin dadka iyo qoysasku

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Labo Toddobaad oo La Hakinayo Hawlaha Bulshada

Iyada oo Oregon sii wado in ay yeelato kiisaska COVID-19 oo aad u sarreeya, Guddoomiyaha Gobolka Kate Brown ayaa ku dhawaaqday labo toddobaad oo la hakinayo hawlaha bulshada ee shan degaan oo ka tirsan Oregon halkaasi oo isku gudbinta cudurka ee bulshadu uu sii kordhayo.

Degaannadi waxay kala yihiin: Malheur, Marion, Multnomah, Jackson, iyo Umatilla. Degaannada Washington, Baker, Union, Clackamas iyo Linn ayaa sidoo kale ku dhow in ay gaaraan qiyaasaha u baahan doona wax hakin labo toddobaad ah. Haddii degaanadani (ama degaano kasta oo kale) gaaraan qiyaasahani, shuruudaha looga baahan yahay wax hakinta ayaa sidoo kale noqon doonta mid khuseysa. Tallaabooyinka wax lagu hakinayo waxay dhaqan gali doonaan muddo labo toddobaad ah, laga bilaabo Noofambar 11 ilaa Noofambar 25. Faahfaahinta hakintu waxay ku jirtaa [war saxaafadeedka](#) Guddoomiyaha Gobolka waxaana ka mid ah xaddidaada isku imaanshaha bulshada ee gurigaaga, ama wax aan ka badnayd lix qof haddii isku imaanshaha uu ku jiro qof ka baxsan gurigaaga.

Marka ay noqoto ODDS, tani waxay sidoo kale ka dhigan tahay in dib loogu noqonayo xaalada halka hoose wax laga bilaabay 'baseline status' ee degaanadani. Laga bilaabo Noofambar 11, ODDS waxay hirgelinaysaa xaddidaadaha soo booqdaha ee kaliya shaqaalaha muhiimka ah ee guryaha koox ahaanta loo degan yahay, guryaha daryeelka ilmo korsiga ee

I/DD. Faahfaahin dheeraad ah ayaa ku jira [Buugga Tilmaamaha Goobta la degan yahay/Daryeelka Ilmo Korsiga](#).

Dhammaan shaqo kooxeedka iyo Hawlaha Taageerada ee Maalintii, iyo adeegyada shaqo ee xarunta ku saleysan ama adeega DSA, ayaa sidoo kale la hakiyay. Faahfaahin dheeraad ah ayaa laga helayaa [Buugga Tilmaamaha Shaqada/Shaqada DSA](#). Haddii aad tahay bixiyaha Shaqada ama DSA oo bixiya adeegyada koox ahaaneed ama xarunta ku saleysan, fadlan sida ugu dhakhsaha badan u la socodsii dadka aad ugu adeegto goobahaasi si aad ugu sheegto in adeegyada la hakiyay muddo laba toddobaad ah. Hay'adaha Maamulka Kiiska waa in ay sidoo kale la xiriiraan daryeel bixiyayaasha ka tirsan degaanadani oo xaqiijiyaan in daryeel bixiyayaashu ka warqabaan tilmaamahan cusub ee la raacayo.

Waxaanu ogsoonahay sida ay xaaladani ugu adag tahay dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka, qoysaskooda iyo asxaabtooda, iyo sidoo kale daryeel bixiyayaasha iyo hay'adaha maamulka kiiska. Ugu dambeyntii, waa in aan sameynaa taxadar si loo ilaaliyo caafimaadka iyo badbaadada dadka aanu u adeegno ee jooga safka hore.

Daryeel bixiyayaasha iyo hay'adaha maamulka kiiska waa in ay sidoo kale ka warqabaan in dadka reer Oregon ee qaba I/DD ay had iyo jeer leeyihiin ikhtiyaar ay kaga baxaan guryahooda. Tilmaamaha [la raacayo ee](#) ODDS wuxuu carabka ku adkeynayaa in daryeel bixiyayaasha guryaha la degan yahay aysan qof guri degin ka mamnuuci karin in uu ka baxo guriga, ama u diidi karin in ay dib u soo galaan guriga. Daryeel bixiyayaasha iyo maamulayaasha kiisku waa in ay dadka ka caawiyaan in ay fahmaan khataraha ka bixida guriga, oo ay ku jiraan bixinta kala doorashooyin kale oo beddel ah. Tusaale, haddii qofka isticmaala adeegyada ODDS uu doorto in uu baxo (oo aado shaqo, ama adeegyo lagama maarmaan ah, madadaalo, iwm.), daryeel bixiyayaashu waa in ay dadka ka caawiyaan in ay fahmaan khataraha oo qofka ka taageeraan in uu sameysto qorshe. Daryeel bixiyuhu wuxuu ku dhiirigelin karaa qofka in uu xirto maaskaro oo dhowro kala fogaanshaha jir ahaaneed, isla markaana si buuxda u dhaqo gacmihiisa marka uu soo noqdo. Hay'ada maamulka kiiska ee qofka ayaa maaskaro u heli karta isaga.

Waad ku mahadsan tahay dadaaladaada aad ku taageerayso dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka iyo qoysaskooda.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa
[http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-
DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx](http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx)

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.